



Qoysaska Qaaliga ah:

Dugsiyada Dadweynaha Oregon way qiimeynayaan xiisada aad u hayso iyo talo dhiibashadaada anaga oo isku diyaarinayna furitaanka Dugsiyada Dhexe ee Harriet Tubman iyo Roseway Heights. Si loo dhiso barnaamij gaar ah oo si sinnaan leh u buuxiya baahiyaha ardayda oo idil, waa in aan u shaqaynaa sidii bulsho ahaan si aanu ugu darno barnaamij tacliimeed oo xoogan oo leh taageero buuxinaysa baahiyaha kala duwan ee dhallinyarada wax baranaysa. Hoos waxaa ku qoran xariiq tilmaamaysa noocyada kale duwan ee hawlaha la qabto inta lagu jiro sanadka si loo dhiso aqoonsiga dugsigeena cusub iyo barnaamijyada. Waad ku mahadsan tihiin dadaalkaaga ku aadan ardaydeena. Waxaan rajeynaynaa in aan kugu aragno dhacdooyinkaasi

Guddiga Goobta	Bishii	Wakiilada ardayga, waalidka, macallinka iyo bulshada ee ka kala socda dugsiga laga imaanayo 'feeder school' oo kasta ayaa u adeegi doona Guddiga Goobta oo cusub. Guddiga Goobta ayaa go'aamin doonta sida loo hirgelinayo aragtida dugsiga iyada oo isticmaalaysa xogta ardayga iyo talada ay dhiibtaan daneeyayaashu.

---

Waan isku imanaynaa si aan u bilowno bilow cusub inaga oo ah hal bulsho dugsi. Galabtan muhiimka ah waa fursad lagu dhageysanayo macluumaadka cusub isla markaana lagu bilaabay ka wada xaajoodka fursadaha loogu talagalay qoyska iyo xubnaha ka tirsan bulshada si loo qaabeeyo mustaqbalka dugsigeena. Kulankani waa kii ugu horreeyay ee lix kulan oo taxane ah.

---

Guddiga Goobtu waxay qaban doonaan kulankooda koowaad si ay ugala hadlaan sharciyada iyo qorshaha shaqada. Waxaanu joojin doonaa 6:30 galabnimo anaga oo casho la qaadan doona bulshada, shaqaalaha iyo xubnaha ka tirsan qoyska. Cashada ka dib, ajandaha kulankeena waxaa ka mid noqon doona macluumaadka cusub ee degmada iyo dugsiga iyo wakhti la sii wadayo qorshaha aragtida ee loogu talagalay Dugsiga Dhexe ee Roseway Heights.

---

Guddiga Goobtu waxay kulmi



